

Warsi Xaafadeed

Sanduuqa Bani'aadamnimada ee Soomaaliya wuxuu u qoondeeyay US \$ 26 milyan oo gargaar naf-badbaadin ah.

Mogadishu, 2 Sebteembar 2021: Sanduuqa Bani'aadamnimada ee Soomaaliya (SHF) ayaa u qoondeeyay \$ 26 milyan oo doollarka Mareykanka ah si kor loogu qaado gargaarka aasaasiga ah illaa 1.2 milyan oo qof oo ku nool dalka. Lacagtan muhiimka ah, oo qayb ka ah Qoondaynta Kaydka SHF 2021, ayaa taageeri doonta la-hawlgalayaasha aan dawliga ahayn ee qaranka iyo kuwa caalamiga ah ee ka hawlgala gobollada Banaadir, Bay, Galgaduud, Gedo, Hiiraan, Jubbada Hoose, Shabeellada Dhexe, iyo Mudug.

Qoondayntan waxay awood u siinaysaa haay'adaha bani'aadamnimada ee Soomaaliya inay kor u qaadaan gargaarka aasaasiga ah ee loogu talagalay dadka aadka u nugul ee ku nool meelaha ay baahida ka jirto," ayuu yiri Mr. Adam Abdelmoula, Isuduwaha Arrimaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya. "Iyadoo ay yar tahay dhaqaalaha iyo maalgelinta, hay'adaha samafalka ee Soomaaliya waxay u baahan yihiin taageero degdeg ah si ay u bixiyaan jawaab ku habboon."

Deeq dhan \$26 milyan ayaa la siin doonaa kooxaha ee u qorsheysan yihiin in kafal-celiyeen arimaha aasaasiga ah iyo howl galada isku dhafan, kuwasoo diirada saarayo biyo la'aanta jirta oo ee sabab u tahay abaarta sii daba dheeraatay, iyo dadka fatahaada saameysay.

Kudhawaad saddexdii meelooda laba meel (\$17 milyan) ee deeqda ayaa loo isticmaali doonaa howlaha mudnaanta leh sida cunnada, caafimaadka, nafaqada iyo biyaha iyo faya-dhoorka. Ilaa boqolkaa 36 (\$9 milyan) ayaa xoojin doona ka falcelinta dadka fatahaada saameysay iyagoo lasiiyo taageero dheerad ah.

Dowladda Germalka ayaa ah hormuud ka ha xagga deeq bixinta loogu talagalay SHF (Sanduuqda Maaliyada Bani'aadamnimo). Waxaa waheliyo Canada, Ireland, Netherlands, Norway, Sweden, Switzerland iyo Boqortooyada Ingiriiska. Sannadkan, Sanduuqa Maaaliyadda ayaa qorsheyay lacag gaareyso \$39 milyan in la siiyo haay'adaha samafalka ee kusugan Somaaliya.

Laga bilaabo 31-ka Agoosto, Qorshaha Ka-falcelinta Arimaha Bani'aadamnimo ee Sannadka 2021, oo doonayay deeq gaareyso \$1.09 bilyan doolar, ayaa boqolkiiba 41 helay. Iyadoo carqaloodin aad u badan jiraan kuwasoo sababay in xaaladda bini'aadamnimo ee dalka ka sii darto, adeegyada aasaasiga u ah noolasha waa in la helo laguna kabo taageero xagga dhaqaalo abuurka.

For more information, please contact

Randa Merghani, SHF manager / Head of Humanitarian Financing, merghani@un.org, Cell +252(0)612922133

Erich Opolot Ogoso, Head of Communications, ogoso@un.org, Cell +254 720 766 587

OCHA press releases are available at www.unocha.org or www.reliefweb.int

Affairs (OCHA). They allow donors to pool their contributions to support the highest priority humanitarian work. Combining flexibility and strategic focus, the funds ensure timely allocation and disbursement of resources, enable humanitarian action and strengthen coordination. For more information about the SHF visit www.unocha.org/somalia/shf or follow [@SHF_Somalia](https://twitter.com/SHF_Somalia); for more information about CERF, please visit www.unocha.org/cerf or follow [@UNCERF](https://twitter.com/UNCERF). For Somalia crisis overview visit www.unocha.org/somalia.